



## Ardayda u socota kulliyadda: codsiyada hore ee taageerada dhaqaale ayaa lagu talinayaan

Ardayda u socota kulliyadda ee raadinaya deeqaha, amahda, waxbarashada shaqada iyo deeqaha waxbarasho waxay weli haystaan waqtii ay ku buuxiyaan Codsiga Lacag la'aanta ah ee loogu talagalay Gargaarka Ardayga ee Federaalka (FAFSA) ama Codsiga Gargaarka Ardayga ee Oregon (ORSAA). Nidaamyada codsiga ee FAFSA iyo ORSAA waxay bilaabmeen Oktoobar 1. Ardaydu waxay codsan karaan sanadkooda u dambeeyaa oo dhan, laakiin la taliyayaasha dugsi sare iyo la taliyayaasha gelitaanka kulliyaddu waxay ardayda ku boorinayaan in ay sida ugu dhaqsaha badan codsiga uga buuxiyaan internet-ka.

“Hadba sida dhakhsaha leh ee ardaydu u buuxiyaan codsiga waxaa jiraysa waqtii badan oo kulliyaduhu u helayaan in ay isku keenaan xirmooyinka taageerada dhaqaale ee loogu talagalay iyaga,” ayay sheegtay Jennifer Satalino, oo ah Agaasimaha Barnamijka The College Place, oo ku yaala Jaamacadda Bulshada ee Portland, Dhismaha Sylvania.

Waxaa sidoo kale muhiim ah in waqtii hore la buuxiyo codsiyada sababta oo ah mararka qaarkood waa la diidaa. Sidaa darteed marka waqtii hore la buuxiyo, waxaad helaysaa fursada ah in aad dib u codsatid.

Janaayo 1 waxay ahaan jirtay taariikhda u horeysa ee la buuxiyo FAFSA, laakiin 2015-kii maamuulkii Obama ayaa taariikhda u riixay Oktoobar 1 si qoysaska loo siiyo waqtii dheeraad si ay si sax ah ugu buuxiyaan codsiga.

“FAFSA waa tilmaanta ugu weyn ee laga dheehdo qorshaha qalin-jabinta ka dib,” ayay sheegtay Jenny Rockwood, oo ah tabaruce ka tirsan Dugsiga Sare ee Cleveland Xaruntiisa Kulliyadda iyo Xirfadda. “Waa talaabada koowaad ee hore ee ugu weyn ka hor inta aanan laga tegin dhismaha, waxayna macnaheedu tahay in ay ka fikirayaan waxa dhacaya dugsiga sare ka dib.”

Ilaa hadda ilaa sanad dugsiyeedkan, Cleveland waxay leedahay heerku u sarreeya ee dhammeystirka FAFSA ee dugsiyada sare ee PPS oo dhan, iyada oo boqolkiiba 52.2 ardaydeedu buuxiyeen codsiga. Rockwood waxay aaminsan tahay in ay sababtu tahay iyada oo dugsigu si joogto ah ardayda ugu dhiirigelinayo in ay codsadaan. Waxaa sidoo kale wadaa dadaal weyn oo ku saabsan la socoshada ardayda codsigooda la diiday.

“Mararka qaarkood waxay noqon kartaa wax fudud sida lambar aan sax ahayn oo ah social security-ga, ama ay ilaawaan in ay riixaan badhanka gudbinta ka dib marka ay buuxiyaan codsiga,” ayay sheegtay Rockwood. “Waxaan awoodnaa in aanu hawsha galno oo aan saxno arrinta isla markaana nidaamka socdsiga dib u socodiino.”

-Pamela Jordan